

INDEPENDENT SCHOOL DISTRICT 196
Rosemount-Apple Valley-Eagan Public Schools
Educating our students to reach their full potential

Somali

Tirada **501.5.5.1.1P** la ansaxiyey **Juun 2007** la cusboonaysiiyey _____

Ciwaanka **Ogoysiis kale oo ku saabsan Talaalada Sharcigu uu qabo in lagu dhufto Ardayda Tacliinta Hore ee Ilmaha la siinayo**

Taariikhda _____

Waalidiinta Qaaliga ah ee Ilmaha _____,

Magaca Ardayga

A. Ilmahaaga waa in ay u dhamaystiran yihiin dhamaan talaalada laga rabo ama aad keento warqad cadeynaysa in aan laga rabin talaaladaa **si kolkaa ilmahaagu iskuulka u sii dhigto**. Kama hayno ilmahaaga talaalada hoos ku xusan:

_____ DTaP	_____ Varicella
_____ Polio	_____ Pneumococcal (2-24 months)
_____ MMR	_____ Hepatitis A
_____ Hib	_____ Hepatitis B

B. Fadlan soo dhamaystir mid ka mid ka ah afartan qaybood ee hoose ka dibna u keen qoraalada la rabo kalaalisada iskuulka joogta:

1. Kolka talaalada kor ku xusan ilmaha lagu dhufto, ku dul qor bisha, maalinta, iyo sanadka) talaalka la bixiyey ka dibna saxiix Foomka (Early Childhood Immunization Form) dhinaciisa kale ee saxiixa laga rabo ka dibna ku soo celi qoraalka kalkaalisada iskuulkaaga; **ama**
2. Hadii ilmahaaga lagu dhuftay mid uun ka mid ah talaalada taxanaha ah ee dhowrka goor la qaato inta ka dhimana aad soo dhamaystirayso sideeda bilood gudahood, dhaqtarkaagu waa in u taa soo cadeeyaa uuna soo saxiixaa Foomka (Early Childhood Immunization Form) dhinaciisa kale ee saxiixa laga rabo, ka dibna ku soo celi qoraalka kalkaalisada iskuulkaaga **ama**
3. Hadii ilmahaaga aan la talaali karin jirkiisa oo talaalka diidaya awgeed ama dhiig laga qaaday lagu xaqiijiyey in jirka ilmahu uu iskii isaga difaaci karo xanuunkaa laga talaalayo, kolkaa waa in aad siiso kalkaalisa iskuulka oraah qoraal ah oo uu saxiixay dhaqtar (waxa aad isticmaali kartaa orhaada dhinaca kale kaga qoran boggan), **ama**
4. Hadii ilmahaaga aan loo talaalayn wax aad aamin san tahay awgood, waa in aad siisaa kalkaalisa iskuulka oraah nootaayaysan ah oo uu saxiisay waalidka ama mas'uulka ilmaha (waxa aad isticmaali kartaa orhaada dhinaca kale kaga qoran boggan), **ama**

C. Hadii aad ka soo baxdo mid ka mid ah kuwan soo socda ee la yiraa Xaq u yeeladka Talaalada Ilmaha ee Minnesota [Minnesota Children (MnVFC) eligibility criteria], waxa aad wici kartaa Xafiiska Dakota County Public Health (952-891-7999) si laguugu siiyo talaalada qiimo jaban (Waxaaba laga yaabaa in aysan ba jiri doonin waxa lacag ah oo laga rabo ilmaha ka soo baxa sharuudahan hoos ku qoran):

- Aadan haysan kaar caafimaad;
- Aad haysato mid ka mid ah kaararka caafimaadka ee Minnesota Medical Assistance (MA), Minnesota Care (MnCare) ama Prepaid Medical Assistance Program (PMAP);
- Hadii aad tahay qof u dhashay Hindida Maraykanka (American Indian) ama Gobolka Alaska.
- Aad haysato kaar caafimaad oo aan bixin talaalada.

D. U soo gudbi cadeyn ah in aad ka soo baxday sharciga talaalada ee gobolka kalkaalisada iskuulkaaga. Soo wac kalkaalisada hadii aad qabto wax su'aal ah oo ku taxa luqa talaalada ilmahaaga. Aad baanu kuugu mahadinaynaa sida aad wax uga qabanayso arintan.

Mas'uulka ka tirsan Iskuulka _____ Kalkaalisada Iskuulka _____